

Siyaasadda JBBA- DHIBAATAYNTA KU SALEYSAN QOLLADA, MIDABKA, WADDANKA ASAL AHAAN UU KA SOO JEEDO , DOOKHA GALMO, AQOONSIGA JINSIGA, NAAFONIMADA AMA DIINTA (ARDAYGA)

I. BAYAANKA GUUD EE SIYAASADDA

Dhibaataaynta ku saleysan qolloda ama midabka, waddanka asal ahaan uu ka soo jeedo, dookha galmo, aqoonsiga jinsi, naafonimada ama diinta, hadda iyo wixii ka dambeeya waxaa loo yaqaanaa dabaqada la dhawro si gaar ahaaneed ayaa loo mamnuucay. Arday kasta ee jooga gudaha Degmada Dugsiga waa in uu helo fursad uu wax ugu baranayo jawi aan lahayn dhibaataaynta noocaas ah sida loogu qeexay siyaasaddan. Ashtakooyinka dhibaataaynta la mamnuucay waxaa si dhakhso ah u baaraya habraacyada lagu qeexay siyaasaddan iyo Habraacyada degmada. Haddii maamulaha dugsiga/madaxa waaxda ama qofka loo magacaabay uu go'aamiyo in dhibaataaynta noocaas ah ay dhacdey, waxay si dhakhso ah oo ku habboon anshax u marinayaan ardayga, macalinka, maamulaha ama hawlwadeenka dugsi kasta ee lagu helo in uu jebiyay siyaasaddan, in ay siiyaan gargaar ku habboon dhibanaha iyo/ama in ay qaadaan talaabada ku habboon ee sida macquulka ah loo xisaabiyay dhammaadka dhibaataaynta. Waxaa raaca baaritaanka ashtakada dhibaataaynta ama takooridda, in maamulaha dhismaha ama qofka loo magacaabay uu u xaqiijinayo ashtakoodaha in dhibaataaynta la gartay ama takooridda la joojiyay, ayadoon la tixgelinaynin natijada baaritaanka, iyo in wax aar-gudasho ah aysan dhicin oo loo geystay ashtakoodaha. Xaqiiqsashadan waxay dhaceysaa toban (10) maalmood gudahooda ee gabogabada baaritaanka.

II. QEEXITAANKA DHIBAATAYNTA KU SALEYSAN QOLLADA, MIDABKA, WADDANKA ASAL AHAAN U KA SOO JEEDO, DOOKHA GALMO, AQOONSIGA JINSIGA, NAAFONIMADA AMA DIINTA

Ujeeddooyinka siyaasaddan, dhibaataaynta ardayga waxay ka kooban tahay dhaqanka jir ahaaneed ama hadalka ah ee la xiriira xaalka ardayga ee dabaqadda la dhawro, marka:

1. habdhaqanka dhibaataaynta uu si kaafi ah u daran yahay, uu joogto yahay ama dhakhso u faafi karo eena saameynaya awoodda ardayga ee ugu qaybqaadanaya ama uu kaga faa'iideysanayo barnaamijka waxbarashada ama waxqabadka, ama abuuraya jawi waxbarasho argagax, handadaad ama afxumo leh; ama
2. habdhaqanka dhibaataaynta wuxuu leeyahay ujeeddada ama saameynta badan ama si aan macquul ahayn u faragelinta fulin hawleedka waxbarasho ee shaqsiga; ama
3. haddii kale habdhaqanka dhibaataaynta wuxuu si lid ku ah u saameynayaa fursadaha waxbarashada shaqsiga.

Tusaalooyinka uu ka koobnaan karo habdhaqanka dhibaataaynta ee khuseysa dabaqada la dhawro, WAXAA ka mid noqon kara:

- sawirderbi oo ku qoran luuqad la qoonsan karo
- magac ugu yeeris, kaftan ama kutiri-kuteen lagu sharaf ridayo dabaqadda la dhawro

- habdhaqan handadaad ama argagax leh
- qoraalo ama sawir-gacmeedyo loo sameeyay sharaf-riddid
- ceebayn, dacaayad taban, iyo ficilo cadaawad
- walax qoran ama garaaf ku muujisan oo ku qoran faalooyin ama dacaayado kuwaasi oo la soo dhejiyay ama la wareejiyay looguna gol leeyahay in lagu sharaf-rido shaqsiyaad iyadoo lagu saleynayo xaalkooda ee dabaqadda la dhawro
- gardaro jir ahaaneed ama weerar kadis ah oo loogu geysto qof kale sababo ah, ama hab ah in si macquul ah ay ula xiriirto xaalkooda dabaqadda la dhawro
- noocyada kale ee habdhaqanka gardarada leh ee sida tuuknimo ama waxyeelayn hanti ahaan

Si kastaba, haddii eedaynta habdhaqanka uu gaaro heerka dhibaataaynta la mamcuucay waxay ku xirnaanaysaa cunsuro badan oo is -wata; sida , duruufaha ku wareegsan, rajooyinka, iyo xiriirada.

Aar-gudashada ka dhan ah qof kasta ee soo gudbiya ashtako dhibaataayn, ka qaybqaadanaya, ama wada-shaqeyn ka yeelanaya baaritaan waa la mamnuucay. Warbixinada xadgudubka beenta ah ee siyaasaddan sidoo kale waa la mamnuucay.

Siyaasadda JK iyo JK-R (Anshaxa Ardayga) waa in ay xakameeyaan anshaxa la xiriira dhibaataaynta ardayga.

La Oggolaaday: 16 Juun, 2000

La muraajaceyay: 20 Juun, 2002

La muraajaceyay: 18 Diseembar, 2003

La muraajaceyay: 15 Oktoobar, 2009

TIXRAACYADA SHARCIGA.: Title VI ee Qododka Sharciga Xuquuqda Shacabka ee 1964, 42 U.S.C. Qaybta 2000d, et seq.

Title II ee Qodobka Sharciga Dadka Reer Mareykanka ee Naafonimada Leh 1009, 42 U.S.C. Qaybta 12101, et seq.

Qaybta 504 ee Qodobka Sharciga Baxnaanista ee 1973